CLEAN HEAT MINNESOTA

## KU TAXALUQIDA GUDOONKA KORONTADDA DADWEYNAHA

Minnesota waxa ay u baahan tahay inay fal hadda sameyso si ay wax uga qabato isbedelka cimiladda ayna u hubiso jabnaanta iyo u sinaanta tamartayada mustaqbalka. Qiimaha oo dhawaan kor u kacay, falal sharci ah oo gobolku soo saaray iyo dhacdooyin hawada oo aad u ba'an ayaa muujinaya inaan u baahanahay inaan degdeg wax uga bedelno jidka tamarta ee aan ku socono. Khatarta ku wajahan cimiladda, caafimaad iyo shaqooyinka aad ayey u weyn tahay. Haddii anaan talaabo qaadin, Minnesota waxa ay gafi doontaa hadafyadda cimiladda **(our climate goals)**, ee aan higsanayno, waxaana khatar kolkaa u noqon culaab saarid dadka iyagu ugu awoodida yar inay bixiyaan kharashaadka korontada ee sareeya. Gudoomiyaha Korontada ee Dadweynahu (Gudoomiye) waxa uu u leeyahay awood qayaxan oo uu ku sameeyo isbedelo waaweyn tamartayada mustaqbalka. La xiriirida Gudoomiyahu waa mid ka mid ah jidadka ugu taabagalsan ee saameyn loogu yeelan karo nidaamka tamarta ee Minnesota ee hadda iyo mustaqbalkaba.

Maadaama Minnesota ay bilowday inay dib u habeyn ku sameyso doorka gaaska dabiiciga ah ee kuleylinta guryaha iyo saraha, waxaa jira iminka fursado qaali ah oo saameyn loogu yeelan karo ra'yiga dadweynaha iyo habka iyadoo lug lagu yeelanayo hawlaha soo socda ee Gudoonka Korontada ee Minnesota. Gudoonku wuxuu jaa qaaday talaabo (**taken action**) ka fal celinaysa qiimayaasha gaaska ee kor u kacaya aana xasilaanayn (**volatile gas prices**), waxa uuna hadda ka qaadayaa dadweynaha jawaab-celin ku saabsan mustaqbalka gaaska ee Minnesota. Waxa aan u baahanahay dad reer Minnesotan ah oo kala soo jeeda dhamaan dhaqaale ahaan, jinsiyad ahaan iyo dhaqan ahaan dadyow kala duwan si ay uga qabgalaan wada tashiga si loo hubiyo in dhamaan in Minnesota ay sameysato isbedelo habka oo macne leh oo dedejiya gudbin cadaalad iyo sinaani ku dheehan tahay oo ka dheer gaaska kuna wajahan xalal tamareed oo nadiif iyo amaanba leh.

## KU SAABSAN GUDOONKA KORONTADA EE DADWEYNAHA

Gudoonka Korontaddu Dadweynahu waxa uu maqooradaa shirkadaha korontada iyo gaaska ee ay maal-geliyeyaashu leeyihiin ee Minnesota. Waxa ayna ka kooban yhiin shan gudoomiye (**five commissioners**) oo uu magacaabo gudoomiyaha gobolku oo xilkaa gudoomiyenimadda ah haya muddo lix sanno ah. Qasdiga hay'ada (PUC's) waa in la hubiyo in shirkadaha korontadda ee Minnesota ay bixiyaan u adeegyadda korontada "si tafatiran, amaan ah, haqabtirka ah, qiimo macquul ah oo xaq ahna ku bixiyaan. Hay'ada PUC waxa ay diiradda saartaa inay isu miisaanto walaacyada dadweynaha iyo kuwa mulkiilayaasha gaarka ah ayna gaarto go'aano waafaqsan maslaxada dadweynaha.

## DARKA/FALANQEYNTA EE GUDOONKA KORONTADA DADWEYNAHA EE KU SAABSAN DOORKA GAASKA EE DHANKA KORONTADDA

Sannadkii 2021, Minnesota waxa ay meelmarisay sharci faraya hay'ada PUC inay si weyn oo guud u eegto sidda aan ugu isticmaalno gaaska guryahayaga iyo saraha iyo in loo baahanahay isbedel dhanka maamulka ah iyo in kale si looga caawiyo gobolka inuu ka soo baxo hadafyadiisa uu higasanay ee cimiladda quseeyo. Hay'ada PUC sidda ugu weyn ee ay uga heli karto jawaab celin dadweynha waa iyadoo la adeegsanayo hab dadweyne oo la yiraa "dar." Darku waa akhbaarta dadweynaha ee ku saabsan kiisaska waaweyn iyo hanaanka xeer sameynta ee ka socda hay'ad dowladeed ama Gudoonka.

Gudoonku waxa uu iminka tixgelinayaa qabashada dhowr xeer hanaaneed oo ku saabsan doorka gaaska ee Minnesota ee iminka iyo korontada mustaqabalka oo ay ku jiraan:

- Darka habka qorsheynta gaaska ee mudadda dheer (Qorsheynta khayraad isu furan ama IRP) docket (dar 23-117) – Gudoonka waxa uu u baahnaan doonaa (**will require**) sedexda shirkadood ee ugu waaweyn shirkadaha gaaska dabiiciga ah ee gobolka (Xcel, CenterPoint and MERC) inay xareeyaan qorshayaal aan mugdi ku jirin oo cadeynaya sidda ay uga soo bixi doonaan baahida mustaqbalka. Iyagoo adeegsanaya nidaamkan, ay dadweynahu waxa ay awoodi doonaan inay ka faalloodaan qorshayaasha shirkadaha korontada ayna ka hadlaan in qorshayaashaasi ay gaari doonaan hadafyadda la wadaago iyo in kale.
- Sharciga Casriyeynta Gaaska (**NGIA**) waxa uu qorsheeyaa (iyadoo laga bilaabayo qorshaha ay soo jeedisay CenterPoint's, darka 23-215)) –(NGIA) waxa ay u ogolaataa shirkadaha korontaddu inay soo jeediyaan "qorshayaal casriyeyn ah" oo ay ku tijaabin dooona khayraadyo kala duwan kaaroon-yareynta. Qorshe walba oo NGIA ah waxa uu u furnaan doonaa faallo iyo jawaab-celin si loo hubiyo in lacagta ay bixiyaan dadka isticmaala loogu adeegsado si xikmad ah farsamooyinka ugu casrisan kuwa hada jira.
- Mustaqbalka Gaaska (darka 21-565), oo raacda qorsheynta NGIA waxay si balaaran u eegtaa **looks more broadly** kuwa ay yihiin xeerarka iyo isbedeladda maqoorida ee loogu baahan yahay habka gaaska ee mustaqbalka si loo gaaro hadafyadda cimillada ee gobolka.

## SIDDA LOOGU TAXALUQO ARRIMAHA GAASKA EE HORYAAL GUDOONKA KORONTADA DADWEYNAHA

Waa aad ku taxaluqi kartaa adiga oo ku biiraya isbahaysiga Kuleylinta Nadiifka ah ee Minnesota, kaa oo kugu hagi doona si-talaabo-talaabo ah sidda loogu lug yeesho hanaanka doodaha ee ka dhacaya Gudoonka Korontada Dadweynaha. Inagoo adeegsanayna isbahaysiga ayaan waxa uunu kuu soo dari doonaa cusboonaysiino waqtiyeysan waxa aana ku siin doonaa dhamaan khayraadka aad u baahan tahay si aad uga qaybgasho – gaar ahaan dadka aan waligood horey uga qaybgelin hanaanadda go'aan gaarida.

## ISQOR HADDA SI AAD ULA SOCOTO WIXII SOO CUSBOONAADA

Fadlan iska qor ololaha Kuleylinta Nadiifka ah ee Minnesota ka dibna waxa aanu u soo diri doonaa cusboobaysiinyo waqtiyeysan iyo khayraadyo ku saabsan cid walba oo ku taxaluqda wada hadalkan lagama maarmaanka.

Iska qor halkan si aad u hesho akhbaarta cusub ee xubnaha hoose halkana iska qor si aad si buuxda ugu biirto isbahaysiga.

NAGU SOO BIIR